HORIZON INSTITUTE




Taxanihii Shanaad ee Fashil-Wadareed

# Sidii Dhawrista Sharcigu U noqon lahayd Xaqiiqo ay Helaan Carruurta Ku Eedaysan Danbiyadu

April 2021

# Hordhac

Xeerarka ciqaabta ee Somaliland waxa ay dejiyeen hannaan sharci oo illaalinaya carruurta lagu eedeeyo danbiyada. Aasaaska Xeerka Garsoorka Carruurta ee 2007 waxa uu ku salaysan yahay fahanka in carruurta, 17 jir iyo ka yar, ayna ahayn qaar mudakar ah sida dadka waaweyn ee 18 jir ama ka weyn. Maadaama ay carruurtu korayaan jidh ahaan, caadifad ahaan iyo maskax ahaan, sharcigu waxa uu qeexayaa in falcelin kasta oo laga bixinayo qaladkaa ay sameeyeen uu ka duwanaado iyada oo lagu xisaabtamayo xaqiiqadaas. Carruurta da'doodu tahay 14 ama ka yar marnaba maaha in loo hayso fal danbiyeed ciqaab ah. Dhallinyarta 15 illaa 17 jir ah, xadhigoodu waa in uu noqdaa tallaabada ugu danbaysa ee la qaadayo, xukunka ugu dheer ee lagu ridi karaana waa in uu noqdaa 15 sanno. Waxa ay aad uga duwan tahay sida wadamada qaar sameeyaan sida Maraykanka oo carruurta 8 jirka ah dacwad lagu soo oogi karo sidoo kalena carruurta aan da'doodu ka weynayn 13 jir xabsi daayin lagu xukumi karo iyada oo aan rajo laga qabin in cafis lagu sii daayo.[1] Isbarbardhig haddii la sameeyo, Xeerarka Somaliland waxa ay dejiyeen qaab-hawleed ula dhaqmaya carruurta ku eedaysan danbiyadu in ay yihiin carruur.

Balse carruurta Somaliland, inta badan ma helaan dhawristaa sharci. Waxa qayb ka ah dhibtaada in Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurtu uu dhigayo aasaaska dhismeyaal u gaar ah carruurta sida maxkamadda iyo xabsiga. Kharashka dhismaha, qalabaynta iyo shaqaalaha hay'adahani waxa ay ku adkaadeen xukuumadihii kala danbeeyey. Maadaama loo arko dhismaha maxkamadda iyo xabsigu in ay yihiin tallaabadii koowaad ee lagu fulin lahaa sharciga, carruurta iyo ehelkooda waxa laga duudsiyey faa'iidadii ay ka heli lahaayeen xeerarkaas.

Carruurta ku eedaysan danbiyada waa in aan lala sugin inta la hirgelinayo kaabayaashaas qaaliga ah waana in ay ka sii faa'iideystaan xeerarkaas. Waaxda caddaaladdu waxa ay fulin karaan Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta, xataa xeerarka u baahan in la helo dhismeyaal cusub, iyaga oo ka duulaya hantida kooban ee ay hayaan.

*Sidii Dhawrista Sharcigu U noqon lahayd Xaqiiqo ay Helaan Carruurta Ku Eedaysan Danbiyadu* waxa uu faahfaahin ka bixinaya tallaabooyinka iyo habka ugu kharashka yar ee loo hirgelin karo iyada oo aan dib u dhac ku imanayn si loo xaqiijiyo in nidaamka caddaalad ciqaabeedku fulinayo dhawristaas. Warbixintani waxa ay si toos

[1] The Equal Justice Initiative, https://eji.org/issues/childrn-in-prison/

ah ula hadlaysaa kuwa ka masuulka ah fulinta xeerarka – booliska, xeer-illaalinta iyo garsooreyaasha– xogtuna waxa ay ku salaysan tahay waayo-aragnimadii Horizon Institute ka heshay bixinta kaalmada sharci ee carruurta xidhan iyo qoyskooda. Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta ee 2007 waxa uu siinayaa booliska, xeer-illaalinta iyo garsooreyaasha sharcigii ay cuskan lahaayeen si ay ula dhaqmaan in ay carruurtaasi yihiin ciyaal yaryar. Uma baahan in ay sugaan inta dhismeyaasha la dhisayo. Hadda ayaanay hawlgalin karaan.

Warbixintani waa qaybtii shanaad oo kamid ah taxane shan qaybood ka kooban, *Fashil-wadareed: Sida uu Hanaanka Cadaaladda Danbiyada ee Somaliland uu u Waxyeelleeyo Carruurta iyo Waxa aan Ka Wada Qaban Karno.* Afartii warbixinood ee u horreeyey waxa ay xuseen caddaalad-darrada soo waajahda carruurta ku eedaysan danbiyada: in dacwad lagu soo oogo iyaga oo aad u da'yar Taxanihii Koowaad; in xabsiga loo taxaabo ka hor inta aan lagu helin danbiga Taxanihii Labaad; in muddo dheer xukun lagu rido qalad yar oo ay ku kaceen Taxanihii Saddexaad; iyo sida waaxda caddaaladdu uga falceliso danbiyada yar yar iyo hab-dhaqanada bulshada ka soo horjeeda ee ay ku kacaan carruurtu Taxanihii Afraad. Taxanihii Koowaad ilaa kii afraad waxay diiradda saarayeen waxa ay dadweynuhu samayn karaan si ay u saxaan qaladaad kaas. Warbixintan u danbaysa ujeedadeedu waa in falanqaynta lagu soo daro booliska, xeer-illaalinta, garsooreyaasha iyo laamaha kale ee xukuumadda. Carruurta Somaliland waxa ay u qalmaan in ay helaan nidaam caddaalad ciqaabeed oo ula dhaqma in ay yihiin carruur. Dhammaanteen, haddii aynu ka shaqayno laamaha xukuumadda ama aynu nahay xubno kamid ah dadweynahu waynu kawada qayb qaadan karnaa xaqiijinta hadafkan.

# Xaqiijinta in Aan Carruurta Lala Xidhin Dadka Waaweyn

Carruurta da'doodu tahay 17 jir ama ka yar waa in aan marnaba lagu xidhin saldhigga ama qolka xabsiga ee ay ku jiraan dadka waaweyni. Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurtu waxa uu xusayaa in ay carruutu leeyihiin xuquuqda in lagu xidho meel ka baxsan halka lagu xidho dadka waaweyn. [2] Xataa Xeerka Ciqaabta Guud ee 1963 waxa uu door-bidayaa in carruurta lagu xidho gebi ahaanba goob ka duwan ama qayb ka gaar ah ta dadka waaweyn lagu xidho.[3] Ujeedadu waa in carruurta gaashaan looga dhigo in ayna la falgalin dadka waaweyn saameyna ayn ku yeelan dadka waaweyn ee galay danbiyada.

Haddana, iyada oo ayna jirin goobo u gaar ah carruurta, kaabayaasha oo aad u koobani waxa ay ka hor istaagaan booliska iyo saraakiisha xabsiga in ay kala saaraan carruurta iyo dadka waaweyn. Ma jiro xabsi u gaar ah carruurta, kaliya dhawr xabsi, Mandheera iyo Burco ayaa leh qaybo u gaar ah carruurta. Duruuftani waxa ay ka jirtaa saldhigyada booliska. Haddii aan la helin dhisme ballaadhan ama lacagtii lagu dhisi lahaa qolol dheeraad ah, jawaabtu waxa ay noqonaysaa in carruurta lala xidho dadka waaweyn. Taasi oo aan noqonayn jawaab.

Booliska, xeer-illaalinta iyo garsooreyaashu waxa ay awood u leeyihiin in ay carruurta marka horeba ka illaaliyaan in ay galaan xabsiga. Xeerku waxa uu siinayaa dhawr fursadood si carruurta loo xidho kaliya haddii ayna u bannaanayn fursad kale. Qodobada xeerarkaa waxa kamid ah.

- Carruurta 14 jir iyo ka yar waa in ayna marnaba gelin xarrumaha booliska iyo xabsiyada.[4] Waxa la qirayaa in ay adag tahay in la sugo da'da carruurta Somaliland halkaas oo ay yar tahay in la helo shahaadada dhalashada ama wax foom kale oo caddaynaya.[5] Waxa jira tallaabooyin ay tahay in lagu dhaqaaqo. Isla marka ilmaha la xidho, saraakiisha boolisku waa in ay da'da ilmaha ka xaqiijiyaan waalidka. Xeer-illaalinta iyo garsooreyaashuna sidoo kale waa in ay sida ugu dhakhsaha badan uga xaqiijiyaan waalidka da'da ilmaha, marka kiisku soo gaadho. Waa in taxadir dheeraad ah laga sameeyaa si loo xaqiijiyo in aan marnaba loo xidhin carruurta 14 jir iyo ka yar. Haddii shaki ka yimaado da'da ilmaha, booliska, xeer-illaalinta iyo garsooreyaashuba waa ina ay caqligooda isticmaalaan go'aankana ku saleeyaan waxa dan u ah ilmaha. Tallaabadani waxa ay yaraynaysaa tirada carruurta ee xabsiyada ku jira.

[2] Qodobka 9(1)(l), Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta (2007) (waxaa loo soo gaabiyaa: "XNGC").
[3] Qodobka 136, Xeerka Ciqaabta Guud (1963) (Hadda ka dib: "Xeerka Ciqaabta Guud").
[4] Qodobka 10, Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta.
[5] Eeg Taxanaha Kowaad ee *Fashil Wadareed* oo ah sida caruurta da'doodu tahay 14 jir iyo wixii ka yar loo eedeeyo, Halkan ka eeg warbixintaasi English iyo Somaliba. https://www.thehorizoninstitute.org/publications/.

- Garsooreyaashu waxa ay isticmaali karaan dammaanadda dhallinyarta da'doodu u dhaxayso 15 illaa 17jir. Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurtu waxa uu u ogolaanaya garsooreyaasha in ay tixgelin siiyaan dammaanadda carruurta iyada oo aan loo eegayn danbiga ay galeen.[6] Tani way ka duwan tahay xaddidaada dammaanadda ee dadka waaweyn sida ku xusan Xeerka Habka Ciqaabta. Balse qodobadani laguma dabaqayo carruurta.[7] Haddii waalid ama masuul uu noqon karo dammiin, waa in dammaanadda loo ogolaadaa.[8] In kor loo qaado isticmaalka dammaanadda carruurtu waxa ay hoos u dhigaysaa tirada carruurta ee lagu hayo saldhigyada booliska iyo xabsiyada ka hor iyo inta ay dacwaddu socotoba.

- Garsooreyaashu waxa ay ku ciqaabi karaan carruurta ciqaab bulshada dhexdooda ay ka adeegayaan si ay uga badbaadiyaan xabsiga.[9] Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta xadhiga waxa uu ka dhigayaa tallaabada ugu danbaysa ee la qaadayo waxanu fursad ballaadhan siinayaa isticmaalka habka xadhig ka leexinta caruurta.[10] Xataa Xeerka Ciqaabtu waxa uu siinaya garsooreyaasha fursad ay ku cafin karaan carruurta.[11]

- Qareenada iyo kaaliyaasha sharciga waa in loo ogolaadaa in ay soo booqdaan carruurta ku xidhan saldhigyada iyo xabsiyada.[12] Gelitaanku waxa uu ku xidhan yahay ogolaanshaha madaxda Hargeysa joogta: Taliyaha Booliska kuwa ku xidhan saldhigyada booliska iyo Wasaaradda Caddaaladda kuwa ku xidhan xabsiyada. Dabcan ammaan ahaan waa muhiim in korka lagala socdo lana adkeeyo gelitaanka goobaha xabsiga. Sidoo kale waa muhiim in la xaqiijiyo in carruurta xidhani ay helaan kaalmo sharci. Qareenada waa in loo ogolaadaa in ay galaan marka la hubiyo in ay yihiin qareenkii ilmaha. Shaqaalaha saldhigyada booliska iyo xabsigu waa in la siiyaa awooda ay ku ogolaan karaan gelitaanka xabsiga iyada oo aan dib loogu noqonayn Xarruntii Guud.

[6] Qodobka 55, Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta

[7] Qodobka 35 iyo 59, Xeerka Habka Ciqaabta (1963) (oo loo soo gaabiyo: "XHC").

[8] Eeg Taxanaha Labaad ee *Fashil Wadareed* oo ah sida damaanada loogu isticmaali karo caruurta iyadoon loo eegayn dambiga lagu soo eedeeyey, halka ka eeg warbixintaasi English keeda iyo Somaligeediiba. https://www.thehorizoninstitute.org/publications/.

[9] Eeg Taxanaha Saddexaad ee *Fashil Wadareed* oo ah sida uu sharciga Somaliland u ogol yahay habka xadhig ka leexinta caruurta iyo hababka kale ee ciqaab badelka, halka ka eeg warbixintaasi English keeda iyo Somaligeediiba. https://www.thehorizoninstitute.org/publications/.

[10] Qodobada 8 iyo 67, Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta.

[11] Qodobka 147, Xeerka Ciqaabta Guud.

[12] Qodobada 9(1)(d) iyo 9(1)(o), Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta.

In dedaalada la geliyo sidii loo isticmaali lahaa xeerarka ogolaanaya in carruurta laga badbaadiyo xabsigu waxa ay yaraynaysaa tirada carruurta ee ku jira xabsiyada iyo werwerka sidii looga sooci lahaa goobaha ay ku xidhan yihiin dadka waaweyni. Xataa haddii mustaqbalka xukuumaddu dhisto xarrumo lagu hayo carruurta ka hor dacwadda iyo xarrumo dhaqan-celin, mudnaanta booliska, xeer-illaalinta iyo garsooreyaashu waa in ay noqotaa sidii loo yarayn lahaa tirada carruurta marka horeba xabsiga loo taxaabayo.

# Sidii Maxkamadda Looga dhigi lahaa Goob La Saaxiib ah Carruurta

Carruurta ku eedaysan danbiyadu waxa ay maraan nidaamka maxkamadda oo loo diyaariyey dadka waaweyn maadaama ayna jirin maxkamado u gaar ah carruurta Somaliland. Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruuurtu waxa ku dhigan qodobo xusaya in la dhiso maxkamado u gaar ah carruurta.[13]Ujeedada laga leeyahay maxkamadda carruurta iyo xabsiga carruurta u gaarka ahi waa sidii looga fogayn lahaa carruurtaas eedaysaneyaasha dadka waaweyn ah looguna adeegi lahaa hab ku habboon da'dooda. Balse in la dhiso maxkamado u gaar ah carruurta Somaliland oo dhan kharash badan ayay ku kacaysaa.

In nidaamka maxkamadda laga dhigo mid la saaxiib ah carruurtu uma baahna dhisme cusub, balse waxa ay u baahan tahay in isbaddel lagu sameeyo habka aynu ula dhaqano carruurta ee nidaamka caddaalad ciqaabeedka oo aan kharash u baahnayn.

- Carruurta waa in aan la keenin maxkamadda iyaga oo katiinadaysan. Xeerku waxa uu dhigayaa in eedaysaneyaasha dadka waaweyn iyo carruurta kaliya la katiinadeeyo haddii looga cabsi qabo in ay baxsadaan ama ay khatar ku yihiin dadka kale.[14] Katiinaddu waa xaalado gaar ah uun ee maaha sharci. Laakiin habka la isticmaalo waqti xaadirkan gaar ahaan magaalooyinka sida Hargeysa waa in eedaysaneyaasha waaweyn iyo caruurtaba la keeno maxkamadda iyaga oo katiinadaysan iyada oo la ogsoon yahay dhibta ay katiinadu soo gaadhsiiso carruurta. Haddii dhab ahaan saraakiisha boolisku uga cabsi qabaan in ilmuhu baxsanyo, waxa ay diyaarin karaan sida loo illaalinayo gaadiidkana loogu qaadayo.

- Sidoo kale, marka ay carruurtu joogaan maxkamadda, waa in aan katiinad lagu xidhin ama aan la dhex gelin qolka qafaska ee maxkamadda haddii ay leedahay maxkamaddu. Waa in sidan la sameeyaa xaalad gaar ah uun haddii la xaqiijiyo in ilmuhu halis ku yahay dadka kale sida xeerku dhigayo.[15] In loo ogolaado carruurtu in ay ag fadhiistan waalidkood ama qareenkooda iyaga oo aan katiinadaysnayn waxa ay ka dhigi lahayd habka maxkamaddu u shaqayso mid ilmaha saaxiib la ah iyada oo aan kharashna ku kacayn.

[13] Qodobka15, Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta.
[14] Qodobka 100, XHC.
[15] Qodobka 100, XHC.

- Si naxariisi ku dheehan tahay in loola dhaqmo carruurta ayaa ka dhigaysa maxkamaddu in ay samaysay jawi ku haboon caruurta. Inta badan marka qof la soo xidho, waxa lagu amraa in ay kabaha saaraan ka hor inta ayna qolka gelin. In loo ogolaado qof kasta in uu kabihiisa xidhnaado ka hor inta aan maxkamadda la hor keenin waxa uu u xaqiijinayaa in la illaaliyey karaamadooda..

- Garsooreyaashu waa in ay doortaan in kiisaska carruurta ay ku qabtaan goob albaabadu u xidhan yihiin oo xafiiskooda ah. Garsooreyaasha dacwadda ku dhegaysta xafiiskooda marka ay buuxaan hoolalka dacwaddu waxa ay xuseen ay ay adag tahay taasi. Balse eedaysaneyaasha carruurta ah arrintani fursad ayay u tahay. Jawiga xafiisku waa mid ayna cabsi badan ka dareemayn albaabadana la xidhi karo si socodka loo joojiyo dadka soo galaya, sidoo kale waxa ay illaalinaysaa sirta carruurtaa eedaysaneyaasha ah.

- Haddii kiis ilmo eedaysane ah lagu qabto hoolka dacwadda, garsooruhu waxa uu awood u leeyahay in uu tallaabo qaado uu jawiga mid munaasib ah uga dhigayo. Garsooruhu waxa uu maamuli karaa cidda soo galaysa albaabada ama wuu xidhi karaa si uu uga dhigo dhegsyiga mid albaabadu u xidhan yihiin. Sidoo kale garsooruhu waxa uu ka soo daadagi karaa kursigiisa si uu ula sinaado goobta uu ilmuhu fadhiyo taas oo cabsida ilmaha hoos u dhigaysa

- In uu xidho maryaha u gaarka ah garsooreyaashu waxa ay ka dhigaysaa qof haybad leh. Balse in uu iska saaro marka uu dhegaysanayo kiis dacwad eedaysane ilmo yar ah waxa ay ka khafiifinaysaa ilmaha cabsidii.

- In maxkamaddu noqoto mid la saaxiib ah ilmaha waxay udub-dhexaad u ah in ay carruurtu fahmaan waxa ku dhici doonaiyo in loo sharaxo iyaga hannaanka. Arrintani waa mid muhiim ah oo Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurtuna amrayo.[16] Way fududahay in la yidhaa balse fullintu way adag tahay marka waqtigu cidhiidhi yahay iyo marka dhegaysiga dacwaddu ka qabsoomayso goob dadweyne. Balse ilmuhu ma fahmayo waxa uu ka dhigan yahay "484" oo ah budhcad, Xataa haddii ay garanayaan "484" ma oga in budhcadnimadu tahay in awood la isticmaalo iyo in xabsigeeduna noqon karo 3 illaa 10 sanno. In waqti la geliyo in loo sharraxo sharciga, hannaanka iyo waxa ay uga dhigan tahay ilmuhu iyadaa oo aan la isticmaalayn luuqadda sharcigu waa hab kale oo garsooreyaashu kaga dhigi karaan jawiga maxkamadda mid la saaxiib ah caruurta da'doodana munaasib ku ah.

- Xataa haddii garsooruhu ka dhigo jawiga mid munaasib ku ah ilmaha, nidaamka caddaalad ciqaabeedku waa mid kakan cawaaqibka ka dhalan karaana waa mid muddo dheer ay qaadanayso in la baddelo sidaa awgeed

[16] Qodobada 61iyo 77, Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta.

waalidku waa in ay la socdaan carruurta eedaysaneyaasha ah. Sidoo kale waxa dammaanad qaadaya Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta.[17] In la hubiyo in waalidka masuul ka ah ilmuhu uu yimaado dhegaysiga marka muddaynta la garanayo waa mid fudud oo kharash yar. marka telefoonada waalidku ku qoran yihiin dokomentiyada maxkamada, kaaliyaha maxkamada ayaa la xidhiidhi kara waalidiinta una sheegaya xilliga ay u imanayaa maxkamada dacwadii ilmahooda.

Bahda caddaaladdu waxa ay fulin karaan dhawrista sharci ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta iyaga oo isticmaalaya kaabayaasha maxkamadda ee hadda jira. Waa suurtagal maadaama waxa loo baahan yahay in la qabtaa ay tahay in wax-ka-baddel lagu sameeyo habka loola dhaqmo carruurta. Waa kharash la'aan. Ta ugu muhiimsani waa in la xaqiijiyo in qof weyni la socdo ilmaha eedaysanaha ah inta dacwaddu socoto si uu ula joogo qofkaa weyni oo uu ku garab galo go'aanka ay qaadanayaan.

*Kani waa sawirka Sadaam iyo aabihii, Axmed. Sadaam waxa xidhay Booliska Magaalada Burco ee Gobolka Togdheer isaga iyo koox kale oo wiilal ah ka dib markii ay dagaalameen. Axmed waxa uu ka ogaaday xadhiga Sadaam qoysaska wiilasha kale ee dagaalka ku lugta lahaa.*



[17] Qodobka 9(1)(f), Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta.

# Fudaydinta Xidhiidhka Waalidka iyo Masuulka Ilmaha

Sida ku xusan Xeerk Nidaamka Garsoorka Carruurta, waxa ay xaquuq u leeyihiin carruurtu in waalidkood ama qofka masuulka ka ah la ogeysiiyo marka la xidho, in waalidkood ama qofka ka masuulka ahi goobjoog ahaado heer kasta oo dacwaddu marayso iyo in si joogto ah ay u soo booqan karaan.[18] Sidoo kale waxa ay xaq u leeyihiin in ay aamusnaadaan oo aan wax su'aal ah la waydiin marka saraakiisha sharci fulintu su'aalaan illaa uu la joogo waalid ama qareen matala.[19] In laga caawiyo sidii ay ula xidhiidhi lahaayeen waalidkood ayaa udub dhexaad u ah hirgelinta xuquuqahaas.

Balse waxa jira caqabado. In la siiyo ilmaha telefoon uu kula xidhiidho waalidkii waa kharash dheeraad ah. Dhallinyarta inta badan waxa laga yaabaa in ayna garanayn telefoonka waalidkii. Caqabadaha kale ee jirta waxa laga yaabaa in waalidka telefoonka iska leh uuna gurigiisu lahayn koranto(laydh) uu ku dabaysto telefoonka.

Waxa jira habab lagu yarayn karo caqabadahaas.

- Saraakiisha boolisku waa in ay dedaal daacadnimo ku dheehan tahay geliyaan si loo xaqiijiyo in qof masuul ahi ogsoon yahay xadhiga ilmaha, iyo saldhigga booliska ee lagu xidhayo. Boolisku waxa ay qoran karaan telefoonka waalidka ama masuulka marka ay xidhayaan.

- Haddii ilmaha la qabto isaga oo falkii dgacanta kula jira, sarkaalka booliskuna u baahdo inuu isla goobtaasi ka xidho, waa in sida ugu dhakhsaha badan ula xidhiidhaan waalidka ama masuulka ilmaha. Haddii ilmuhu aanu garanayn lambarka, waa in sarkaal loo diraa guriga ilmaha. Tani waxay sidoo kale fursad u siinaysaa sarkaalka booliska in uu soo qorto telefoonka waalidka.

- Telefoonka lagala xidhiidhayo qoyska waa in lagu daraa dhamaan dhokumenti maxkamadda ee kiiska ilmaha haddii loo gudbiyo saldhig boolis oo kale ama xabsi. In lambarka telefoonku ku qornaado warqadda qabashadu waxa ay fursad u siinaysaa saraakiisha xabsigu in ay la xidhiidhaan waalidka ilmaha.

Carruurtu waa in ayna waajihin xukunka ciqaabta ama xabsiyaynta iyaga oo ayna la joogin waalidkood ama qofkii ka masuulka ahaa, taas oo caqabad ku noqoto booliska iyo saraakiisha maxkamaddu in ay xidhiidh la sameeyaan waalidka ilmaha.

[18] Qodobada 9(1)(f) iyo 9(1)(o), Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta.
[19] Qodobka 9(1)(e), Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta.

# Xalka Mudada Dheer ee Kor loogu Qaadayo Nidaamka Garsoorka Carruurta

Himilada Guud ee Sidii *Dhawrista Sharcigu U noqon lahayd Xaqiiqo ay Helaan Carruurta Ku Eedaysan Danbiyadu* waa tallo-soojeedinta ay u baahan tahay in tallaabo degdeg ay qaadaan bahda caddaaladdu si loo ixtiraamo xuquuqda carruurta ee jabiya sharciga. Yaraynta tirada carruurta ku jirta xabsiyada, in maxkamadda horteeda loola dhaqmo in ay yihiin carruur iyo in marwalba loo ogolaado in ay xidhiidh la sameeyaan waalidkood lacagina kuma kacayso mana aha wax adag oo aan la samayn karayn. Faa'iidaduna waa mid aad u ballaadhan. Waxa yaraan lahayd tirada carruurta meel lagula xidho dadka waaweyn, faa'iidada in la helo nidaam maxkamadeed oo gaar u ah carruurta waa la xaqiijin karaa carruurtuna may ahayn in ay maraan nidaamka caddaalad ciqaabeedka iyaga oo aan taageero ka ahaysan waalidkood ama qofka masuulka ka ah.

Isbaddelkan, oo ah mid adag in la fuliyo, ma baddeli karaan maalgashiga mudada dheer ee nidaamka caddaalada. Xarrumaha lagu hayo carruurta iyo maxkamaduhu ee ku xusan Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurtu waa in la dhisaa mustaqbalka. Xataa marka la dhiso, waa in mabaadiida hagaysaa ay noqotaa in carruurta kaliya la xidho, dacwad lagu soo oogo xabsiga loo taxaabo ***haddii la waayo fursad kale.*** In dhisme ballaadhan la haystaa kama dhigna in carruur badan la soo xidho. Dhismaha lagu xidhayo carruurtu waa in uuna noqon mid gaar ah balse isla habkii loola dhaqmayey dadka waaweyn loola dhaqmo carruurta.

In kasta oo Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta ee 2007 uu dejiyey hannaan aad u wanaagsan, waxa jira dib-u-habayn loo baahan yahay in la sameeyo si ay xeerka u sii bayaamiso. Ta ugu mudani waa in la caddeeyo da'da ilmaha "in uu ka yar yahay 18 jir" ee qaybta qeexitaanka. Hadda, waxa uu ku qeexayaa carruurta kuwa ka yar 15 jir balse qaybo kale waxa uu dhigaya waa kuwa ka yar.[20] Tani waxa ay abuuraysaa jahawareer iyo in si qaldan loo isticmaalo xeerka taas oo ka dhigaysa carruurta da'doodu u dhaxayso 15 illaa 17 sanno in sharci ahaan meel ay ku tiirsadaan ayna jirin. Waxa kale oo jirta soojeedin in wax-ka-baddel lagu sameeyo sharciga taas oo faa'iidadeeda si tifaftiran loogu qoray warbixin ay *Horizon Institute* baahisay 2015.[21] Wax-ka-baddel kasta oo mustaqbalka la sameeyo, niyad-samaanta in carruurta la xidho kaliya marka la waayo fursad kale waa in la sii joogteeyaa.

[20] Qodobka 1, Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta.
[21] Talo soo jeedimihii *Horizon Institute* ee ahaa in wax ka badel lagu sameeyo Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta (2015), waxaad ka heli kartaa halkan, https://www.thehorizoninstitute.org/resources/.

# Gaadhista Mustaqbal Xuquuqda Carruurta la Dhawro

Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta ee 2007 waxa uu u dejinayaa booliska, xeer-illaalinta iyo garsooreyaasha qaab-hawleedka ay u baahan yihiin si ay u dhawraan xuquuqda sharci ee carruurta lagu eedeeyey danbiyada ay u noqoto xaqiiqo ay helaan. Waa sharci ay tahay in bahda caddaaladdu ay ku faanto fulinteeda. Goobaha sharci ee xeerarka yaalaa ay yihiin qaar duugoobay ama ayna ka turjumeyn xaaladda taagan, xeerkan, inkasta oo uu galdaloolooyin leeyahay, waxa uu isku dayayaa in la qaato qaybaha ugu wanaagsan ee qaanuunka, Shariicadda iyo Xeer-dhaqameedka si uu u fidiyo qaab-dhismeed illaaliya awooddana saara sidii dhaqan-celin loogu samayn lahaa carruurta lagu eedeeyey danbiyada. In xabsiyaynta carruurtu noqoto tallaabada ugu danbaysa ee la qaadayo, sharcigu waxa uu u saamaxayaa carruurtu in ay joogaan guryahooda iyo dugsiga halkaas oo ay ku haystaan fursadda ugu wanaagsan ee koritaanka una noqon lahaayeen muwaadiniin masuuliyiin ah oo qaybna ka qaata mustqabalka Somaliland.

Waxa aanu soo dhawaynaynaa talobixinaha ka imanaya akhristayaasha ee khusaysa sida arrinta lagaga hadlayo warbixintan loogu faafin lahaa si baahsan dhagaystayaal kala duduwan tiiyoo ujeedadu tahay ilaalinta dhamaan caruurta ku nool Somaliland.

***Hay'adda Horizon waa Urur Maxalli ah oo ka hawlgala Somaliland kana shaqeeya sidii loo horumarin lahaa sarreynta sharciga iyo xuquuqal insaanka. Warbixinaha iyo daraasadaha aanu soo saarnaa waxa ay daah-furaan arrimaha taaggan ee lagu ogaaday shaqada aanu qabano. Waxa ay bixiyaan xog iyo gorfeyn loogu tallo galay in ay cariso doodda ka dhaxaysa daneeyeyaasha, dadweynaha iyo deeq-bixiyaasha iyo in ay kor u qaado siyaasadaha xukuumadda iyada oo lagu salaynayo qadarinta xuquuqal insaanka, sarraynta sharciga iyo dhiirigelinta isku filaanshaha.***

***Si aad wax badan uga ogaatid hawsha aanu qabano, fadlan booqo degalka internet-ka aanu ku leenahay ee www.thehorizoninstitute.org nagala socda Twitter @Horizon_SL iyo Facebook @HorizonInstituteSomaliland.***

***Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay, waxa aad nagala soo xidhiidhi kataa email-ka info@thehorizoninstitute.org iyo telefoonada +252 523603 / 0634717933***

## NALA SOO XIDIIDH

6th Floor, Omar Hashi Building
Hargeisa, Somaliland
+252 523603 / (0)634717933

info@thehorizoninstitute.org

### Soo booqo baraha internet-ka

www.thehorizoninstitute.org

Twitter: @Horizon_SL

Facebook: @HorizonInstituteSomaliland

All photos by Petterik Wiggers



HORIZON INSTITUTE